

## Shurudaha Masuuliyadda Macmiilka

The Washington Department of Social and Health Services (DSHS) waxay ka rabtaa qaar ka mid ah macmiilka ku jira barnaamijka Consumer Directed Employer (CDE) qeyb ka mid adeegyada daryeelkooda. Macaamiishani waxay bixiyaan lacagta "Masuuliyadda Macmiilka" ama qaddarka wada-bixinta lacagta bil kasta. Cadada waxaa go'aamisa DSHS iyada oo ku saleynaysa dakhliga macmiilka. Dukumentigan wuxuu qeexaya shuruudaha Consumer Direct Care Network Washington (CDWA) ee ka shaqaynta Mas'uuliyadda Macmiilkaaga.

### Aasaaska

- Masuuliyadda Macmiilka waxaa horey loogu yaqaanay qaybta aad bixinayso lacagta ama Qarash Dhaafka Baahiyaha Gaarka ah (PNA).
- Qadarka Mas'uuliyadda Macmiilka waxaa go'aamiya DSHS, maaha CDWA.
- CDWA ayaa ka helaya xogta lagala xariiraayo dhammaan ka qaybgaleyasha iyo wadarta guud ee lacagta Masuuliyadda Macmiilka DSHS.
- La xiriir Maareeyaha Kiiskaaga ama Khabiirka Gunnooyinka Dhaqaalaha ee DSHS haddii aad qabto su'aalo ku saabsan cadadka Masuuliyadda macmiilka.
- Lacagta waxaa la siinayaa CDWA, lama siinaayo DSHS, wala IP-gaaga.
- Adeeg bixiyaashaada Gaarka ah (IP) ayaa la siinayaa lacagta dhammaan saacadaha ay soo gudbiyeen lana aqbalay.

### Ka shaqaynta

- CDWA waxay soo saari doontaa bayaan 15ka bisha bil kasta oo adeegga la baxshay.
- Haddii kharashka daryeelkaagu ka yar yahay lacagta Mas'uuliyadda Macmiilka, waxaa lagu siin doonaa qiimo dhimis dalabka bisha xigta ee lacagta.
- Waxaan kuugu soo diri doonaa bayaanka Masuuliyadda Macmiilka ee lacagta boostada. Bayaannada cadaynta lacagta ayaa iimeelka lagu diri karaa haddii ciwaan iimeel ay kaa hayso CDWA.
- Bayaankaaga waxaa ku jira qaddarka Mas'uuliyadda Macmiilka, baaqiga haray, lacagaha la bixinaayo, iyo qiimo dhimisyada.
- Lacagta waxaa la siinayaa CDWA ugu danbayn taariikhda ku qoran bayaankaaga.
- Haddii lacagta oo buuxda aan la bixin taariikhda loo cayimay, waxaad dhaafaysaa xilii lagaa rabay inaad lacagta ku dhiibto.

### Xisaabaadkii Xiligii la Rabay ka dib dhacay

- Haddii lacagta lagugu lahaa waqtigeedii dhaafto, waxaad heli doontaa ogeysiiska ah inaad dhaaftay mudadii 30 maalmood/joojinta adeegga.
- IP-gaaga iyo Maareeyaha Kiiskga ayaa sidoo kale ku ogeysiin doonaa xaalada koontadaada.
- Baaqi kasta oo aan la bixin kahor taariikhda joojinta adeegga ayaa keeni doonta in lagaa saaro adeegyada CDE.
- Haddii la joojiyo:
  - Waxa aanu ogaysiin doonaa IP (yada) xaalada akoonkaaga si ay u ogaadaan in aan wax lacag ah laga siin doonin adeeg kasta oo la bixiyo inta lagu jiro mudada joojinta.
  - Maareeyaha Kiiskaaga ayaa joojin doona ogolaanshaha CDE.
  - Waad inaad la shaqeysa Maareeyaha Kiiskaaga si uu kuugu diyaarsho adeegyada kale.
  - Waxaa dib lagugu soo celi karaa adeegyada barnaamijka CDE marka lagugu leeyahay oo dhan aad bixiso.
  - Waxaan kuu warejin kara koontada dambiga si loo qaado adeegyada.

### Lacag bixinada

- Waxaan aqbali karna qaababka lacag bixinta soo socda:

- Kaarka deynta ama kaashka
- Jeeg ama Dalabka Lacagta
- Lacagta ayaa lagu bixin karaa oonlaynka ayadoo halmar ah.
- Waxaad nagula soo xiriiri kartaa boosto, iimayl, ama telefoon si aad u bixiso lacagta.
- Wac oo la hadal Waaxda Dayn Aruurinta haddii aad doonayso inaad ku xirato lacag bixin joogto ah si loo baxsho wadarta guud ee Masuuliyadaada Macmiilka ee lacagta.
- CDWA ma aqbasho lacag cadaanka ah ama in lacagta lagu bixiyo goobaha xafiiskeena.
- CDWA ma bixiso qorsheyaasha bixinta lacagta ee sida yaryar loo dhiibo.
- Haddii lacag bixintaadu la diido sabab la xariirta inaad heysanin lacag kugu filan darteed (NSF), xiridda koontada, diimada kaarka deynta ama sabab kale, waxaan:
  - Isku dayi doona inaan mar kale lacagta aad qaadno, iyo/ama,
  - Waxaan kala soo xiriiri doonaa qaab kale ee lacag bixinta.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan Masuuliyadda Macmiilka, fadlan nagala soo xiriir iimaylka [InfoCDWA@ConsumerDirectCare.com](mailto:InfoCDWA@ConsumerDirectCare.com) ama telefoonka 866--214--9899.

#### Tusaalaha jadwalka Masuuliyadda Macmiilka

Bisha adeegga ee Masuuliyada Lacageed ee Macmiilka	Bayaankaaga lacag bixinta ayaa lasoo diri doonaa	Lacagta waa in la dhiibaa
Luuliyo 2022	Luuliyo 15, 2022	Agoosto 15, 2022
Agoosto 2022	Agoosto 15, 2022	Sibteembar 15, 2022
Sibteembar 2022	Sibteembar 15, 2022	Oktoobar 15, 2022